Public Health England

NHS

# Tallaalka Qaaxada (TB-da) ee BCG

## iyo cunugaaga



immunisation

habka ugu habboon ee lagu ilaaliyo caafimaadka cunugaaga

**Waraaqahani waxay ku saabsan yihiin tallaalka BCG (Bacillus Calmette-Guérin) oo la yabooho si uu uga ilaaliyo cunugaaga xanuunka qaaxada (TB-da).**

## Waa maxay tallaalka BCG?

Tallaalka BCG waxaa ku jira nooc daciif ah oo bakteeriyada (jeermiska) sababta Qaaxada ah (TB-da). Iyadoo la daciifiyey awgeed ma keeneyso cudurka qaaxada (TB-da), balse waxay ka caawineysaa cunugaaga inuu yeesho difaac ka hortaga qaaxada (TB-da) haddiiba uu waligiis la kulmo. Tallaalka BCG wuxuu si gaar ah waxtar ugu leeyahay ka ilaalinta dhallaanka iyo carruurta yaryar noocyada dhifka ah ee aadka u darran ee qaaxada (TB-da) sida TB-da qoorgooyaha (qanjirada maskaxda oo barrara).

## Waa maxay qaaxada (TB-da)?

Qaaxada (TB-da) waa caabuq bakteeriya ah, badanaa waxay ku dhacdaa sambabada laakiin sidoo kale waxay ku dhici kartaa qayb kasta oo jirka ka mid ah. Qabidda caabuqa qaaxada (TB-da) waxaa suurtagal ah in uusan isu bedelin cudurka qaaxada (TB-da). Cudurka qaaxada (TB-da) ayaa si tartiib ah jirka ugu kordha, waxayna qaadataa dhawr bilood in astaamuhu soo muuqdaan. Badanaa dadka qaba caabuqa qaaxada (TB-da) weligood kuma dhaco cudurka qaaxada (TB-da). Dadkan, bakteeriyada qaaxada (TB-da) ayaa noloshooda oo dhan jirkooda ku ahaaneysa mid aan firfircooneyn. Dad kale (tusaale ahaan, kuwa nidaamkooda difaaca uu dafiic yahay), bakteeriyada ayaa suurtagal ah in ay firfircoonaato dabadeedna keento cudurka qaaxada (TB-da). Inta badan dadka ku nool dalkan si buuxda ayey uga bogsadaan ka dib daaweynta, laakiin waxay qaadataa dhowr bilood.

## Waa maxay astaamaha TB-da?

TB-da waxaa ay saameyn ku yeellan kartaa meel kasta oo ka mid ah jirka. Astaamuhu way kala duwanaan doonaan calaamadaha cudurka ilmahana waa ay ka duwanaan karaan kuwa dadka waaweyn. Maadaama qaaxada (TB-da) la is qaadsiin karo, waa muhiim in aad cudurka qof kale ku aqoonsan kartid.

Waa inaad la xiriirtaa dhakhtar haddii adiga, cunugaaga, ama xubin kale oo qoyskaaga ka mid ah, ama saaxiib uu leeyahay mid ka mid ah astaamaha soo socda:

- Qufac joogto ah oo socda in ka badan saddex todobaad
- Qandho
- Dhidid, gaar ahaan habeenkii
- Miisaanka oo sabab la'aan dhaca
- Dareen guud iyo mid aan caadi ahayn oo daal iyo caafimaad darro ah
- Qufac dhiig leh

## Sidee qaaxada (TB-da) loo qaadaa?

Qaaxada (TB-da) waxaad ka qaadi kartaa oo keliya qof sanbabadiisa ama cunihiisa uu horey ugu dhacay caabuqa oo qufacaya. Marka ay qufacaan, waxaa soo baxa dhibco yar yar oo ay ku jirto bakteeriyada. Haddii ay dhibcahaasi neeftaada gudaha u raacaan adigana waa ay kugu dhici kartaa, Waxay qaadataa xiriir dhow iyo mid dheer oo lala yeesho qof cudurka qaba, tusaale ahaan guri lagu wada noolaado, si aad ugu sugnaato halis in cudurka lagu qaadsiiyo.

## Ilaa iyo intee ayey qaaxadu (TB-da) faafsan tahay?

UK sanadihii 1950-meeyadii, waxaa jiray in ka badan 50,000 oo xaalado cusub oo qaaxada (TB-da) ah sanadkiiba. Maanta, tiradan waxay hoos ugu dhacday in waxyar ka badan 6,000 oo qof oo xaalado cusub ah oo qaada cudurka sanadkiiba. Marka, inkastoo aysan u badneyn in aad qaadid caabuqa, hadana qof walba waa inuu ka warqabaa astaamaha qaaxada (TB-da).

Arintani si gaar ah ayey muhiim u tahay sababtoo ah Qaaxadu (TB-da) waa cudur adduunka oo dhan ku baahsan.

Khatarta cudurka ayaa ku badan dadka ku noolaa ama ka shaqeeyey dalal ay ku badan tahay qaaxada (TB-da). Caruurta ka soo jeeda qoysaskan ayaa iyagana u badan in ay xiriir dhow la yeeshaan xubno bulshadooda ka mid ah oo cudurka qaba, ha ahaato UK ama wadankoodii ay asal ahaan ka soo jeedeen.

## Maxay tahay sababta cunugaaga loo siinaayo talaalka BCG?

Gudaha UK, sida dalal kale oo badan, BCG waxaa la siiyaa dhallaanka ay suuragalka tahay in ay xiriir la sameeyaan qof qaba qaaxada (TB-da). Tan waxaa ka mid ah dhallaanka ku nool aag ay ku badan tahay qaaxada (TB-da) ama dhallaanka waalidkood ama awoowayaashood/ayeeyayaashood ka soo jeedaan waddamo ay ku sareyso (TB-da) qaaxada (ka eeg bogga 7aad wixii macluumaad dheeri ah).

## Sidee loo tallaalayaa cunugeyga?

Cunugaaga waxaa laga siin doonaa tallaalka BCG qaybta kore ee gacanta bidix.

Tallaalka waxaa badanaa loo yaboohaa dhalashada ka dib inta cunugu weli ku jiro isbitaalka, laakiin waxaa la bixin karaa wakhti kasta ilaa shan sano.

## Ma jiraan wax waxyeelooyin ah?

Isla marka la duro kadib, fin soo kacay ayaa soo muuqan doonta. Tani waxay muujineysaa in durista loo siiyey si sax ah

Laba illaa iyo lix todobaad gudahood duritaanka ka dib waxaa soo muuqan doona dhibic yar. Tani waxay noqon kartaa xanuun ilaa dhowr maalmood, balse si tartiib tartiib ah ayey u bogsaneysaa haddii aadan daboolin. Waxay reebi kartaa nabar yar

Mararka qaarkood, cunugaagu wuxuu yeelan karaa nabar-gacmeed hoose meeshii looga duray. Haddii ay tani dheecaan dareerineyso una baahan tahay in la daboolo, isticmaal maro qallalan - waligaa ha isticmaallin balaastar (plaster) - illaa ay qolof ka yeelato. Nabarkaani wuxuu qaadan karaa ilaa dhowr bilood inuu bogsado.

Haddii aad welwelsan tahay ama aad u maleynaysid in nabarku caabuq yeeshey, markaa dhakhtarkaaga arag.



## Ma jiraan wax sababo ah oo keeneysa in uusan cunugeyga qaadan tallaalka BCG?

Sida tallaalada kale badankood, duritaanka ayaa suurtagal ah in aan la siinin ama ay noqoto in dib looga dhigo haddii:

- cunugaagu uu qabo qandho sareysa:
- cunugaagu ay haysato xaalad guud oo caabuqa maqaarka ah. (Haddii ay cambaar jirto, meesha duritaanka ayaa loo dooran doonaa meel aan laheyn nabarrada maqaarka).

Marar dhif ah, carruurta leh difaac daciif ah, bakteeriyada ku jirta tallaalka ayaa u horseedi karta caabuq daran.

Aad ayey muhiim u tahay in aad u sheegto kalkaalisada ama dhakhtarka haddii ilmahaagu leeyahay, ama looga shakisan yahay, difaac daciif ah. Tusaale ahaan:

- ilmuhu waxaa ku socda daaweynta kansarka ama xaalado kale oo halis ah.
- hooyada ilmaha ayaa marka ay uurka lahayd qaadaneysey daawada difaaca hoos u dhigta.
- waxaa jira hidde qoysku uu leeyahay oo ay dhibaato ku qabaan nidaamka difaaca (oo ay ku jirto caabuqa HIV).




## Dhallaankee u baahan in ay qaataan tallaalka BCG

Xitaa haddii aadan ku noolayn xaafadaha dhallaanka oo dhan loo yabooho tallaalka BCG cunugaaga ayaa wali u baahan karaa tallaalka.

Haddi aad uga jawaabtid '**Haa**' mid ka mid ah su'aalaha soo socda waa in dhakhtarkaaga ama kalkaalisadaada aad cunugaaga u weydiisaa tallaalka BCG.

- Cunugaaga, hooyada cunugga, aabaha ama awoowaha/ayeeyada, ama qof kasta oo kula nool, miyey ka soo jeedaan waddan ay ku sareyso qaaxada (TB-da)?
- Adiga iyo cunugaagaba miyaad la noolaan doontaan ama aad la joogi doontaan saaxiibo iyo qoys ku nool mid ka mid ah waddamadan?
- Ma jiraa qof kula nool, ama waqti badan la qaata cunugaaga, oo hadda qaba qaaxo (TB) ama horay u qabay qaaxo (TB)?



Wadamada ay ku badan tahay qaaxada (TB-da) waxaa laga soo qaatay tirooyinka Ururka Caafimaadka Adduunka (WHO) ee:

**www.gov.uk/government/publications/tuberculosis-tb-by-country-rates-per-100000-people**

## Miyaan u baahanahay in aan waxyaalo kale ogaado?

Cunugaaga wuxuu bilaabi karaa tallaalkiisa joogtada ah marka uu jiro sideed todobaad kumana xirna goorta ay qaateen tallaalkooda BCG. Waa inaad hubisaa in cunugaaga aan laga siin duris kale isla gacanta laga siiyey tallaalka BCG ugu yaraan saddex bilood ka dib; haddii kale qanjirrada halkaas ku yaalla ayaa barari kara.



Hubi in tallaalka BCG lagu daro Diiwaanka Shaqsiga ah ee Caafimaadka Ilmahaaga (buugga cas) si loo tixraaco mustaqbalka.

## Macluumaad dheeraad ah

Haddii aad rabto macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan qaaxada (TB-da), ama tallaalka BCG ama tallaalo kale, la hadal dhakhtarkaaga, booqdahaaga caafimaadka, umulisadaada ama kalkaalisadaada; ama booqo website-keena ah: **www.nhs.uk/vaccinations**.

**Xusuusnow, daaweynta qaaxada (TB-da) waxaa ay qaadataa muddo dheer, ka hortagga ayaa aad uga sahllan.**

NHS

© Xuquuqda daabacaadda Crown 2019

2900193B 75K 1p FEB 2019 (APS)

Si aad u dalbato nuqullo dheeraad ah oo buug-yarahan ah, booqo: **www.orderline.dh.gov.uk** ama taleefoon u dir: 0300 123 1002, Minicom: 0300 123 1003 (8 subaxnimo ilaa 6 galabnimo, Isniin ilaa iyo Jimce)